Mahadhadii Ibraahim Xuseen Ismaaciil “Cirrasuge”

C. C. Faarax “Barwaaqo”

Ibraahin Xuseen “Cirrasuge”

Qoraalkan waxaannu si kooban oo tafaqyo-tiran ugaga hadli doonnaa mahadhadii *Abwaan Ibraahin Xuseen Ismaaciil* oo loo yaqaan “*Cirrasuge*”. Ibraahin wuxuu hadda deggen yahay magaalamadaxda dalka Kanada ee Ottawa. Wuxuu leeyahay qoys ka kooban 9 carruur ah iyo hooya -dood.

1947kii ayuu *Ibraahim* ku dhashay magaa-lada Burco ee gobolka Togdheer. Aab -bihii *Xuseen Ismaaciil*, Alla ha u naxariistee waxa uu geeriyooday 1984kii.

Shan gu’ kolkuu jirey baa Ibraahin lagu daray malcaamaddii la odhan jirey *Fallaaxo, taasi* oo ku tiil dawladda hoose ee Hareygsa agteeda, halkaa-sina waxa uu ka baranjirey quraanka iyo af-carbiga. 1959kii dugsaga hoose ee *New Hargeysa*, oo waagii hore la odhanjirey *Rees Elemetry School*, ayuu ka bilaabay waxbarasha -diisii hoose. Dugsiga dhexe ee ma-gaalada Sheekh ayuu ka qalin jebiyey 1966-kii. Waxa uu Ibraahin sheegay inuu xasuusan yahay arday badan oo ay dugsigaa wada dhigan jireen. Waxaana ka mid ahaa buu yidhi Abwaanka weyn ee *Maxamed Xaashi Dhamac“Gaarriye”.* Isla gu’gaasi ayuu Ibraahin galay dugsiga sare ee *Banader ee* magaalada Muqdisho.

Siduu Ibraahin sheegey kolkii uu dugsiga Banadir ka baxay waxa loo qaatay dugsigii la odhanjirey “*Training School for animal health Assistanace”* oo ay lahayd Wasaaradda Xanaannada Xooluhu, kuna yiil Afgooye. Laba gu’ kadib ayaanu ka qalin jebiyey dugsigan dambe.

1972kii ayuu Ibraahin shaqadii u horreysey ka bilaabay magaalada Muqdisho. Wa-xaanu u shaqeeyey Wasaaraddii Xannaanada Xoolaha iyo Dhirta iyo Daaqa.

Dabayaaqadii 1972kii ilaa iyo badhtamihii 1973kii wuxuu isaga dabqaadi jirey inta u dhaxaysa Raaskamboonni iyo Muq- disho. Halkaasi oo laga wadey qormaha cidhibtirka cudurka dabakarruubka.

1973kii-1974kii waxa uu madax ka noqday qaybta Wasaaradda Xoolaha ee degmada Afgooye. 1975kii ayaa loo beddeley Hargeysa. Lix bilood kadib Xamar ayaa looga yeedhay, halkaasi oo loo diray xaruntii tababarka ee Xalane. Markii uu dhammaystay tababarkii waxa uu Ibraahin sheegay in warbixintii laga soo qoray ay ahayd inuu ahaa nin kacaan ah.

waxa, haddaba, caado ahayd qofkii kacaan lagu sheegaa inuu madaxda dawladda isku dhedhejiyo si jagooyin waaweyn loogu dhiibo. Hayeeshee, Ibraahin wu -xuu sheegey in kolkii uu ogaaday in lagu tilmaamay inuu kacaan yahay uu gudbiyey codsigiisii u horreyey ee shaqo-ka-tegista. Kolkii lay weydiiyey sababta aa shaqada uga tegayana waxan idhi buu yidhi, “Waxan rabaa inaan shaqada ka tago intaan kacaanka ahay”. Ibraahin wuxuu noqday ninkii u horreeyey ee doona inuu shaqada ka tago isaga oo kacaan ah.

Arrintu siday doonto hawdhacdee, riyadiisi umay rumoobin oo waa laga diiday codsigii uu qortay. Ibraahim

diidmadaasi kumuu niyadjabin. Si isdabajooga ayuu kolka codsi laga soo diidaba ku kale u weydaarin jirey. Waxaanu sheegey in codsigiisii laba iyo soddonaad laga soo oggolaaday!

Inkasta oo uu Ibraahin ka tirsanaa Wa-saaradda Xannaanada Xoolaha, dhan -ka nabdiga wuxuu ka tirsanaa kooxdii Waabberi ee Wasaaraddii Warfaafinta iyo Hanuuninta dadweynaha.

Riwaayaddii la odhanjirey "*Labuun bay -s dhinacyaalle dhaayahaaga ku fiirso*" ayaa noqotay riwaayaddii u horreysey ee uu dadweynaha u soo bandhigo. Riwaayaddaasi oo noqotay mid caan ah heesihii ku jirey waxa ka mid ahayd heesta caanka ah ee la yidhaa ***"Cunnaabi"*** oo ay wada qaadaan hoobalka *Muuse Ismaaciil Qalinle* iyo hoobaladda *Saado Cali Warsame.* Midhihii heestaasi oo aanay dadku badi wa-da aqoonin ayaannu Ibraahin ka codsannay inuu noo oggolaado inaannu dad weynaha u bandhigno, waxaanay ahaayeen sidan hoos ku qoran:

Hadduu caawa igu yidhi
Badda cagaha geliyoo
Timaha caaradaw sooh
Soo xidho cunnaabiga! [1]

Saddex qayd cartiiloo [2]
Weli caaryo jabiniyo
Cambarshe [3] *iyo laasimo* [4]
Sindi ceerigaabiya [5]
Hadduu cududda ii sudhay
ila caarid anigee
Calafwaa halkiisee
Caashaqan iskeen baray
Haygu carinin anigee
Ku cugtaye ma nabad baa?
Hogol curatay dayroo
Darroor [6] *cidhifyadiisiyo*
Coodanle [8] *ku hoortoo*
Intay xaadhay caymaha
Cosobkiyo barwaaqada
Ciddii nabad ku daaqoo
Faraxad lagu caweeyoo
Xigsimooday [9] *cuudkii*
Ayaad ii cajabisee
Xiddigtii cirjiidhaay!

Calaf waa halkiisee
Caashaqan iskeen baray
Cawadii adduunkaay
Igu curay sidii roob!
Caanyo [10] *nacasa mooyee*
Gaaridu ma caasido

Curadkii hagaagee
Ciiddaw shaqeeyee
Dalka caabbiyaayee
Sida caykan aad tahay
Cuudkana daweeyee
Hadduu yidhi cuntada daa
Ha cabbine biyaha diid
Cudur weeye halisee

Calaf waa halkiisee
Caashaqan is keen baray
Haygu carinin anigee
Ku cugtaye ma nabad baa?
Cir-guduudda waagiyo
Himirtoo [11] *casaatiyo*
Cillal [12] *rays ku baxayeey!*
Doonbir [13] *caano gelisiyo*

Waxa tahay cadceeddoo
Beeraha cagaarka leh
Cambaha iyo caadkii
Ku caddaysey nuurkee

Calaf waa halkiisee
Caashaqan iskeen baray
Cawadii adduunkaay
Igu curay sidii roob!

Heesaha riwaayaddaa ku jirey waxa kaloo ka mid ahayd heestan hoos ku qoran oo la yidhaa ***ergo***. Waxaanay tidhi:

Ergo wixii la siiyaba
Anfac bay ka dhigataa
Ereygii la soo faro
Uumiyahay dhex keentaa
Waa ammaano haysoo
Kama taliso eeddee

Maahmaahda odayadu
Erey waxay ku sheegeen

Ruuxii albaab xidhan
Ku garaaca amar li'i
Waxa uu ka eegaa

Aflagaaddo weeyee
Af aan adiga kugu ool
Aammus lama yidhaahdee
Arrintaadu inanyahay
Waa oodo dhacameed
Dhexda aad abbaartoo
Tii sare illowdee

In kastoo ugbaadiyo
Onkodiyo hillaac maro
Duunyadu adaahida
Maba oomataysoo
Ubaxa iyo dooggaa
Abaaraha ku qaadhee
Dhuun baa afiyo moqor
Labadaba ogaatee
Waxaad iila egtahay
Ayax xuur jeclaadee
Allahayow maxay noqon
Iga raacday eediye!!

Heesaha la yaabka leh ee riwaayaddaa ku jirey waxa kaloo ka midahayd heestan hoos ku qoran oo la yidhaa ***Uneexo*** oo runtii midhaheedu ku xusuusinayaan quruxdii deegaanka Soomaaliyeed. Wa-xaanay tidhi:

Adna gaaddo ka ciyaar
Gubatiyo afmeer[1] baad
Goon[2] aad u hawriyo[3]
Af-gubkoo[4] bislaadiyo
Uneexada[5] ka gurataa
Gaameelo[6] dhogoriyo
Gan jacayl ka baxaybaan
Anna gacan ku haystaa
Oo aan garmaamada[7]
Gilgilaad naftaydiyo
Genbiyaad ka baqayaa!

Ila gudhiye caashaqu
Kaayagee garaaddaran?
Niman golaha joogine
Noo garqaadimaayee
Tolow yaana kala guri?

Adna raydab[8] guuniyo
Gaaraabidhaanlaad[9]
Arah [10] aad ku gaadhoo
Maadh laba gardhawdiyo [11]
Midho aad ka gurataa!

Illayn laguma guuraan
Gaadiid xun weeyee
Anna waxan ku gooshaa
Ismagabe jacayloon
Gadhka taabo leeyahay
Inuu ii garaabee!
Ila gudhiye caashaqu
Kaayagee garaaddaran?
Niman golaha joogine
Noo garqaadimaayee
Tolow yaana kala guri?

Gembis iyo garduuriyo [12]
Taag laba gardayaad[13]
Adna timo garaaralay
Maydhaxdii galoolkii
Xadhig garab ku soohdaa!
Aniguna gantaalaha
Goroflegedka[14] hoosiyo
Gaaddada jacaylkaan
Gawraha qabowiyo
Gabaddanada dayrtiyo
Ka galaa cadceeddee!!

Ila gudhiye caashaqu
Kaayagee garaaddaran?
Niman golaha joogine
Noo garqaadimaayee
Tolow yaana kala guri?

Kolkuu Ibraahin shaqadii dawladda ka tegey waxa uu u shaqo tegey dalka Sacuudiga, halkaasi oo uu joogay sannad qudha. Waxaanu dib ugu laabtay Dalkii. 1987kii ayuu go'aan- saday inuu ku biiro dagaalkii hubays -naa ee uu ururkii SNM kula jirey taliskii macangagga ahaa ee Maxamed Siyaad Barre. Isla gu'gaasi ayuu u tallaabay dhanka iyo dalka Itoobiya, si uu uga qaybqaato halganka. Wax yar kadib markii maammulkii Ururka SNM gacanta ku dhigay gobolladii woqooyi kuna dhawaa -qay goonni isu taagga S/land ayuu Ibraahin u soo doolay dalkan Kanada oo uu hadda ku suganyahay.

Maansadan hoos ku qoran oo la yidhaa ***Alabla'*** wuxuu Ibraahin curiyey intii uu Itoobiya joogey iyadaana isqeexaysa. Waxaanay tidhi:

Tarankiisa aadmiga
Asallkiisa hore raac!
Oorida laboodkuba
Isirkeedu waa feedh
Nebi Aadan laga jaray!
Asna wuxuu ka uunnaa
Dhoobadii ashuunkoo
Arwaax soo jireenoo
Aqoon yahanna lagu daray!
Innagana jacaylkani

Unug buu ahaa beri
Mar abaydin soo maray
Haatan ababay oo kacay!
Isha sahan ka deeqdaye
Eegmada u rooneey
Talo wada aloosnee
Alabliyo[1] Makhfuud [2] baan
Ishinkoo [3] mar wada dhalay
Aqal laba daryaala ah
Indho daalis [4] kebediyo
Googgoos [5] istaahila
Toddobaadle [6] ilaxidhay
Isku jooggu daahyahay
Loo jaray ardaa weyn
Ku aroos geleynaa!
Onkod iyo hillaacii
Soo alalag yidhiyeey
Ambaqaadday laabtee

Ilayskii cadceeddaay
Udug roob wadaad tee
Hadduu uunku doogsado
Reerka idhanka laan-xayd
Ama aygi yoondheer[7]
Ambaal[8] iyo marraag[9] furo
Ruuxii awood darran
Ha ka rogannin ooddee
Alla-bari kolay tahay
Marti soorka la ogow!

Allamagan ka dheerow
Isla weynta nacasta ah
Orod badan itaal daran
fiidkii aleegada
Ku ammaanye deriskii
Ha ka seexan adhigee
Usha qaado subixii!

Intii ay Soomaalilaand ku dhawaaqday goonni isu taaggeeda maan la kulmin cid calankeeda cusub wax ka tidhi. Maruu arrintaa ka hadalyey wuxuu noo mariyey maansadan hoos ku qoran oo la yidhaa *calan:*

Calan yahaw babbanayaa
Dhaaxaad casuusiyo
Cawlaanka boodhkiyo
Ciiradu ku saarrayd
Midabkaagu caawana
Cusayb duuggi kuu xigay
Casaan iyo caddaaniyo
Waa cagaarka dooggoo
Caadil magaci lagu dhigay!

Heegan ciidan kaagaa
Kaa ilaasha cadawgoo
Culimadaadii diintaa
Eebbe ku cuskadayoo
Cashar kuu tufaayoo
Carruurtiyo haweenkaa
Ku salaamay calanyahow!
Cilmi iyo aqoonbaa
Caqligii yaboohshoo
Cilladdii sal guurtoo
Collob gaaxsanaydiyo
Cimilada habboon baa
Carradii ku baahdoo
Dhallinyaro cuddoon baa
Ku caleemo saaree
Cawriyo ilba la'aw!

Heegan ciidan kaagaa
Kaa ilaasha cadawgoo
Culimadaadii diintaa
Eebbe ku cuskadayoo
Casharkuu tufaayoo
Carruurtiyo haweenkaa
Ku salaamay calanyahow!

Cirkii baa da'aayoo
Balliyada cammirayoo
Cuudkii baa dhalaayoo
Cosobiyo tigaaddiyo
Qawl caaro bixiyiyo
Kob caleen leh joogoo
Caanihii lalulayaa
Codcodka iyo faarkii
Weelka laga cidaadaa!
Heegan ciidan kaagaa
Kaa ilaasha cadawgoo
Culimadaadii diintaa
Eebbe ku cuskadayoo
Casharkuu tufaayoo
Carruurtiyo haweenkaa
Ku salaamay calanyahow!

Mar uu Kanada iyo dhibaatada uu kala kulmay ka hadlayana wuxuu Ibraa -hin ka yidhi:

Dhuur webi ku taalliyo
Dhool sanqaday hillaaciyo
Dhadhankeeda himirtiyo
Dheehii xantooshaay [1]

Dhudhummadu lammaanaan
Dhaxal bay ku reebaan!

Dhurde[2] malabka wada tacab

Gaaggur[3] baanu dhaliyaa
Shimbiruhu dhashooday
Dugsoon ugu dhaqaaqaan
Dhalandhoolka[4] tooraha[5]
Raad wuxu isdaba dhigo
Dheeftana aboorkuba
Karantuu dhitaystaa
Anna awr ma dhaansado!

Dhimbiishii[6] galoolkaay
Dhegcastii madheedhkaay
Dhalankii rumaankiyo
Caashaqa dharkiiysaay
Baraf jooja dhiiggiyo
Dhaxantiyo dabaylaha
Dharab[7] saaran doogiyo

Dheel[8] da'aaya subaxdaa
Igu wada dhacaayoo
Way dhawr saniyo bilo
Dhacarsiga[9] adaahida[10]
Dhilashada iniinyaha
Moqorrada[11] ka dhaansigu!

Anoo dhuraya deebaaq
Ku dhergaaya gaajada
Tiiraanyo dhaqan lumay
Dhul shisheeye magansaday
Dhagdhagtii arooskiyo
Dhallinyaro ciyaartiyo
Dhaacashada[12] kalgacalka leh
Hayga filan dhammays guur!

Mar la weydiiyey hadduu dhanka diinta wax ka yidhi iyo in kale waxa uu Ibraahin mariyey maansadan soo socota oo uu Quraanka kaga hadlay. Waxaanu yidhi:

Digrigiisa weyniyo
Deeqdiisa Eebbee
Dadka lagu mannaystiyo
Waa duco Quraankani
Dawo iyo wax lays faray
Wax loo diiday Aadmiga
Qodobbada Distoorkee
Dadka lagu xukumayiyo
Sheeko duul horoo lumay
Iyo duugga Aakhiro
Laba saboo la kala dego!

Isaga oo mar kale dhanka diinta ka hadlaya wuxuu yidhi:
Quruxdeeda dunidaa
Cirka iyo dhulkaba quban
Qaaddir iney u sugantahay
Kumaan qaadan karahayn
Oo laga qaboojaa?

Qasawaadkii Xunayniyo
Qalalaasihii Beder
La qudhgooyey gaalada
Quruxsame Rasuulkii
Qalanbaawiyiintii
Qoomkii dagaalgalay
Qiyaamaha hortiibuu
Qiimo geliyey Eebboo
Qaayibe Fardawsoo
Qosol tahay salaantuba!
Qawlkii Ilaahay
Inuu yahay Quraankani
Qisaskii Rasuushiyo
Sidii qooman loo rogey
Qaadan waayey amarkii!

Aayadaha Qayuumkaa
Qalbigaaga gelayee
Qaar iga dambaabiyo
Dhegta kii ku qaadee
Qarda jeex jafaayow
Qabyo maaha Diintuye
Qoton maysku xidhannaa
Qandood maw rakoocnaa?
Qaaddir maw dhawaannaa
Sujuud wada qashuucnaa?

Dadkuse qawrax joogto ah
Qardoofada hammuunta le
Qarmacaadda beenta ah
Ama qawdhan fara badan
Qormo miyey ku degeyaan
Qaddar lama illaabee
Quud miyey kordhinayaan
Aan Weynahood qorin!